



Gargaarka Cuntada (Degdeg)

Expedited (Emergency) Food Stamps

FIIRO GAAR AH: Gargaarka cuntada waxaa lagu magacaabaa SNAP (Barnaamijka Kabitaanka Gargaarka Nafaqada Kabitaanka Cuntada)

Maxaa laga doonayaa gargaarka cuntada ee degdegga ah?

“Dadajin” waxaa loola jeedaa la boobsiiye. Haddii aad ka soo baxdo shuruudaha, 1 maalin ayaad ku heli kartaa gargaarka cuntada oo la dadajiyey. Xaaladaha qaarkood, waxa aad gargaarka cuntada ku heli kartaa 1 maalin gudaheed. Waajib kuguma aha in aad cunto la’aan ahaato. Kuguma khasbi karaan inaad tago goobaha cuntada lagu qeybiyo ama kaniisadda.

Yaa xaq u leh dadajinta cuntada?

Waxa aad xaq u leedahay gargaarka cuntada haddii aadan heysan lacag aad cunto ku iibsato waayo:

- Kirada ama bixinta kharashka kale ee guriga, lacagta biyaha iyo korontada, ayaa ka badan dakhliga ku soo gala ama lacagta bangiga kuu taal.
- Dakhliga guud ee ku soogala ayaa ka yar \$150 bishiiba, lacagta bangiga kuu taalana ay ka yar tahay \$100. Dakhliga guud waxaa loola jeedaa lacagta shaqada kaa soo gasha inta aan canshuurta laga jarin.

Maxaa dhacaya haddii aan dhawaanta u soo guuray Minnesota?

Gargaarka MFIP iyo lacagta caddaanka ah ee GA, waa in aad sugtaa 30 cisho ka dib marka aad u soo guurto Minnesota. Sugitaanka 30 cisho ah MA khuseyso gargaarka cuntada.



- Haddii lagaa soo siiyey gargaarka cuntada bishan gobolka aad horey u daganeyd, waa in aad sugtaa ilaa bilowga bisha soo socota si aad u hesho gargaarka cuntada.
- Haddii aadan ka qaadan gargaarka cuntada gobol gale, waa aad codsan kartaa dadajinta gargaarka cuntada ee Minnesota.
- Haddii aad ka baxsaneyso rabshadaha qoyska, waxa **aad** codsan kartaa gargaarka cuntada inta badan sharciyada korana **kuma** khuseeyaan.

Maxaan yeelayaa haddii aan ahay qof soo haajiray ama shaqaalaha xilliyada qaarkood?

Xaq ayaad u leedahay dadajinta gargaarka cuntada haddii:

- Dakhli kasta oo ku soo gala bisha aad codsaneyso gargaarka, waxaa lagu siiyey ka hor taariikhda aad codsaneyso **IYO**
- Lacag dambe kaama soo galeyso shaqada bisha aad codsaneyso **IYO**
- Ma fileysid in ay ku soo gasho wax ka badan \$25 goobtan cusub 10ka maalmood ee soo socda.

Xafiiska maamula gargaarka cuntada ma xisaabo magdhawga ay goobta shaqada kaa siiso socodka shaqada.

Sidee ayaan u codsadaa gargaarka cuntada ee la dadajiyey?

Tag xafiiska gargaarka cuntada. Inta badan degmooyinka Minnesota waxaa ku yaal Xafiiska Gargaarka Dhaqaalaha (*Economic Assistance Office*).

- Buuxi codsiga. Haddii uu waqtigu kugu yar yahay, waxa aad ku buuxin kartaa magacaaga iyo cinwaankaaga, taariikhda oo saxiix. Inta kale mar dambe ayaad buuxin kartaa.
- Tus aqoonsigaaga. Waxaad tusi kartaa ogolaashaha wadidda gaadiidka ama aqoonsiga gobolka, ama cadeyn kasta oo muujineysa qofka aad tahay. Waxa uu noqon karaa telefoonka qof ku garanaya oo sheegi kara qofka aad tahay - sida shaqaalaha hoyga dadweynaha ama qof qaraabo kula ah. Haddii aadan heyn wax cadeyn ah, waxa aad saxiixi kartaa waraaq iyada oo lagu dhaariyey.



Haddii aad u baahan tahay gargaar markiiba ah, waa lagu wareysanayaa si loo xaqiijiyo in aad ka soo baxday shuruudaha gargaarka cuntada degdegga ah **maalinta** aad codsato.

Meeqa ayaa la siinayaa gargaarka cuntada?

Haddii aad codsato 15ka bisha ka hor, waxaa lagu siinayaa gargaar cunto oo bisha dhan ah. Haddii aad codsato 15ka bisha ka dib, waxaa lagu siinayaa maalmaha bisha ka haray iyo gargaarka cuntada ee bisha soo socota.

Ma jiro xad u go'an sanadka ama inta qofku nool yahay ee gargaarka cuntada ee la dadajiyey marba haddii qofku ka soo baxo shuruudaha ku xiran gargaarka cuntada ee bilaha u dhaxeeya.

Maxaa yeelayaa haddii la ii diido?

Haddii aan lagu ogolaan gargaarka cuntada ee la dadajiyey, racfaan ayaad ka qaadan kartaa. Buuxi foomka racfaanka ee xafiiska ama waraaq u soo qof adiga oo sheegaya waxa aad racfaanka ka qaadaneyso. Dusha kaga qor racfaanka “Dadajinta”, si markiiba looga shaqeeyo. Nuqul (koobi) ka reebo. La soo xiriir xafiiska degaankaaga ee gargaarka sharciyada si ay kuu caawiyaan.

Akhri xogta urursan oo aad ka heli karto, [Racfaan U Qaadashada DHS](#).



Si lagaaga caawiyo xaaladaha kale ee degdegga ah, wac 211 gobolka oo dhan. Waxa kale oo aad fariin qoraal ah ugu soo diri kartaa nawaaxiga aad degan tahay ama kala hadli kartaa barta internetka www.211unitedway.org.

Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalan xogtan urursan haddii ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2021 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.